

SHARCI n. 19 ee 5ti feberaayo 1973.

Bugaagta laga dhigo Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKI UU ARKAY Warqaddii Koowaad iyo Warqaddii labaad ee Kacaankii oktoobar 21, 1969;

MARKII LA TIXGELIYEY inay lama huraan tahay in la siiyo tarjumada qoraalka buugaagta ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ee ku baxda luqadda Qaranka ee kuliyaadaha kala duwan ee isla jaamacadda;

MARKI AY OGGOLAADDEEN Golaha Sare Kacaanka iyo Golaha Xoghaynta Dawladda;

WUXUU SHAACINAYAA

Sharciyada soo socda:

Qod. 1.

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed waxa lagu dhigi karaa Af Soomaaliga sida afafka kale (carabi, talyaani iyo ingiriis).

Qod. 2.

Wasaaradda waxbarashada iyada oo la tashaneysa Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed waxay mas'uul ka tahay u tarjumidda Afka Soomaali Bugaagta hadda la dhigo kuliyaadaha kala duwan ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

Qod. 3.

Nadaamka dhaqan galinta sida ugu habboon ee sharcigaan waxaa XEER ku soo saari doona Madaxweynaha Golaha Sare Kacaanka kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Waxbaridda Dadweynaha.

Qod. 4.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa si saameyn degdeg ah, waxaana lagu soo saari doonaa Warsidaha rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 5 feberayo 1973.

MADAXWEYNAHA

Golaha Sare ee Kacaanka

Magg. Jen. Maxamed Siyaad barre